

CENTRAL BANK OF SOMALIA



البنك المركزي الصومالي

BANGIGA DHEXE EE SOOMAALIYA

CBS/CU/0679/2021

Khamiis, 24 June 2021

## WAR-SAXAAFDEED

### Shir looga arrinsanayey cabashada 50ka dollar oo Bankiga dhexe qabanqaabiyey 23/06/2021

Bankiga Dhexe ee Soomaaliya ayaa shalay oo taariikhdu ahayd 23ka Juun shir u qabtay madaxda sare ee Bankiyada, Xawaaladaha iyo Shirkadaha bixiya adeegga lacagta danabaysan (mobile money). Shirkaas waxaa looga hadlay hakadka ku yimid isticmaalka lacagta 50 ka doolar, oo ay cabashooyin ka yimaaddeen.

Madaxda shirkadaha lacagaha ka shaqeeya iyo mas'uuliyiinta Bankiga Dhexe waxay ila qireen in arrintani ay ka dhalatey dacaayad ku saabsan in lacago 50 dollar been-abuur ah ay suuqa ku jiraan, taas oo kalsooni-darro gelisay suuqa lacagaha. Baaritaan uu sameeyay Bankiga dhexe iyo shirkadii uu la qaatay mas'uuliyiinta shirkadaha lacagaha ka shaqeeya waxaa ka soo baxay in aysan jirin sabab rasmi ah oo loo diido isticmaalka 50 ka doolar.

Sidaas daraadeed, Bankiga Dhexe iyo dhammaan mas'uuliyiinta shirka ka soo qeyb galay waxay isku afgarteen inay dib u bilaabaan isticmaalka 50 ka doolar isla markaasna shacabka loogu adeego noocyada lacagaha oo dhan, oo uu ka mid yahay 50ka Dollar.

Gudoomiyaha bankiga dhexe Cabdiraxmaan Maxamed Cabdulaahi ayaa sheegay inuu raja fiican ka qabo go'aanka shirkaan ka soo baxay. "Waxaan rajeynayaa in maanta shirkeena uu noqdo mid xal u noqda dhibaataada dusha ka saaran bulshada soomaaliyeed, gaar ahaan inteeda nugul, waxaanu kalsooni buuxda ku qabnaa in go'aankan uu fuli doono laga bilaabo berrito oo taariikhdu tahay 24/06/2021.

Shirka waxaa dabasocda kulam Bankiga Dhexe warbaahinta u qaban doono dhawaan si loola wadaago go'aanka wadajirka ah ee Bankiga Dhexe iyo dhammaan shirkadaha ruqsadda u haysta bixinta adeega lacagaha.

Bankiga dhexe waxaa ka go'an horumarinta, kobcinta iyo ilaalinta xasilloonida hab-maalayadeedka dalka.

=DHAMAAD=

